

[vc_row][vc_column][az_blank_divider][az_soundcloud soundcloud_track_number="284931909"][/vc_column][vc_row][vc_row padding="default-padding" bg_attachment="scroll"][/vc_column width="1/2" el_class="col-xs-12 col-sm-6 col-md-6"][/vc_gallery_images images_gallery="3283,3284" gallery_random_order="yes"][/vc_column][vc_column width="1/2" col_padding="default-color-padding" col_padding_top_value="40" col_padding_bottom_value="40" col_padding_left_value="40" col_padding_right_value="40"][/vc_column_text]Khatarta ay dad badani u bareeraan si ay u tagaan yurub waa mid aan la soo koobi Karin. Lakin dhibaataadii uu la kulmay Ayaanle waa wax aan lagu soo koobi Karin halkan. Nabarada wejigii ku xardhani waxay markhaati u yihiin dhibtii uu la kulmay si uu u yimaado yurub. Ayaanle ayey ku qaataday 3 beri inuu ku yimaado dalka Giriiga safar doon ah oo kaga soo baxay dalka Masar. Iyaga oo isku diyaarinaya in aad ka xirtaan meel xeeb ah ayey waxay arkeen markab ku soo fool leh. Mukhalisiintii doonta waday waxay dadkii ku amreen in la wada aamuso.

*“Waxaan maqlay dhawaqa xabad la ridayo. Mukhalaskii doonta nagu waday wuxuu soomalidii ku amray in ay galaan dhanka hoose ee doonta” ayuu yiri Ayaanle.
“xabaddii dhacaysay waxay sababtay in doontii aan saarnay uu dhaco qarax. Dadkii waxay u baqeen naftooda”*

Noloshii fiicnayd ee uu Ayaanle filayey waxay isku bedeshay dhibaato lama ilaawaan ah. Waxaa meeshii isaga iyo soomalidii kale la geliyey ku qabsaday dab. Markii isdayey in dabkaas ka baxsado waxaa jirkiisa oo dhan soo gaaray dhaawacyo dab ah. Xanuunkii dabka dartees wuxuu isku tuuray badda waxaana ku adkaatay in uu dabaasho waayo wuxuu dareemayey xanuunka dabka. Wuxuu markii dambe u dabaashay dhanka markabkii sababay dabka.

“Bal qiyaas qof uu gaaray gubashada heerka sadexaad” ayuu yiri Ayaanle. “qofna uma dulqaadan karo dab intaas le’eg oo kugu gaara badda dhexdeeda. Waxaan arkayey hilibkaygii oo uu dabku cunayo... waxaanse ku dadaalayey in aan naftayda badbaadiyo.

Nasiib wanaag waxaan aqaanay dabaasha lakin dad kale ma garanayn dabaal. Waxaan maqlayey iyaga oo qaylinaya”

Markii la badbaadiyey Ayaanle iyo dadkii kaleba, waxaa loola cararay isbitaalka.

“Maalintii xigtay waxaan soo toosay iyada oo jirkayga oo dhan lagu dhabooqay kareem cad” sidaas waxaa yiri Ayaanle soo xasuusta dabkii uu u galay isbitaalka.

“ninkii boolis ayaa agtayda taagnaa. Wuxuu I waydiiday in aan wax u baahanahay, waxaana waydiistay koob biyo ah. Wuxuu I siiyey biyihii, waxaa isna ii yimid dhaqtarkii si uu u eego caafimaadkayga. Markaas ayaa miyir iigu dambaysay”.

Ayaalne wuxuu galay kooma uu ku jiray muddo ku dhow bil. Markii uu soo naaxay waxba ma xasuusan Karin, waxna ma cuni Karin. Dawayntii lagu wadayna weli fari kama qodnayn. Xaalkiisu wuxuu u soo hagaagayey si tartiib tartiib ah waxaana loo wareejiyey. Wuxuu meeshaas ugu tegay dad badan oo sugaya in loo aqoonsado qaxootinimo.

“Codsiga qaxootinimadu wuxuu qaataa waqti badan” ayuu yiri Ayaanle. “ waxaa kaa dhumaya kalsoonida sida aad u sugaysid.

Xiliga waraysiga laga qaadayey, Ayaanle weli wuxuu sugayey in codsigiisa qaxootinimo la aqbalo.

Halkna ka dhegayso Ayaanle oo ka sheekaynaya dhibaataada safarkii

yurub[/az_column_text][vc_column][vc_row][vc_row section_id="distributionbar"][vc_column el_class="col-sm-12 col-md-8 col-md-offset-2"][az_blank_divider height_value="30"][az_tag_list topic_list="yes" place_list="yes" pub_date="yes" modified_date="yes"][az_blank_divider height_value="10"][az_date_credit_list pub_date="yes" modified_date="yes" interviewer_enabled="yes" author_enabled="yes" photographer_enabled="yes" interviewer_name="Deeka Abdi Said" author_name="Deeka Abdi Said" photographer_name="Deeka Abdi Said"][/vc_column][vc_row][vc_row section_class="sky-back"][vc_column][az_column_text]Related stories[/az_column_text][vc_column][vc_row][vc_row section_mode="fluid"

no_margin_padding="yes"][vc_column][az_related_posts related_posts_module="portfolio"
related_posts_columns_count="4clm" related_posts_number="4"
el_class="community"][/vc_column][vc_row]